

Waalidka ama Mas'ulka Sharafta leh:

Waxaan ku faraxsanahay inuu canuggiina ka mid noqon doono ardayda barnaamijka Afka Ingiriisiga ee dugsigeena. Hadafkeena ugu horreysaa waa dhiirigelinta ardayda in ay akhristaan buugaag badan oo wanaagsan, waxna ka qoraan kana hadlaan buugaagtaas. Hadafkeena muddada dheer waa abuurista akhristayaal/waxbarteyaal noloshooda oo dhan. Ujeeddada koorskan waa abuurista akhristayaal iyo qoreyaal karti leh oo si buuxda xoog u saaraan wax akhrista iyo wax qorista. Barnaamijka wuxuu leeyahay labo hadaf: U suurta gelinta ardayda helista qalab kala duwan oo akhris ah iyo kartida garashadooda, kaalmaynta ardayda kala soocidda iyo qiimaynta qalabkaan, iyo u fidinta waqtiga dugsiga gudahiisa ku saabsan wax akhrista, wax qorista iyo ka hadalka buugaagta.

Intii lagu jiro fasalkaan, ardayda si caadi ah ayey wax akhrisan doonaan soona qori doonaan. Buugaagta la isticmaali doono waxay noqon doonaan kuwo isku jir ah, qaar waa qiyaali iyo qaarka kale na ma aha. Intaas waxaa u dheer, ardayda waxay ka qayb qaadan doonaan wada hadal iyaga iyo macallimiinta iyo saaxiibdooda kale waxii kasoo baxa fasalka akhrista/qorista.

Macallimiinta waxay soo xuleen mowduucyada maktabadaha fasalka kuwaasoo daboolaan baahida ardaydooda kala duwan. Mowduucyadaan waxay noqon karaan kuwo ku xiran koorska, mowduucyo lagu taliyey oo ka yimid liis buugaag kala duwan, iyo talooyin ka yimid ardayda iyo macalliminta. Xulashada qaarkeed fasalka oo dhan ayaa akhrisan doonaan; qaar kalena waxaa lagu wada hadli doonaan kooxo yar-yar fasalka gudahiisa. Fadlan ka fiirsada manhajka koorska mowduucyada gaarka ah ee laga isticmaali doono fasalka oo dhan ama kooxo yar-yar buugaagtood. Sidoo kale Ardayda keligooda waxay xulan doonaan mowduucyo shaqsi ahaan ay u akhristaan maalin walbo. Ardayda qaarkood waxay doortaan inay buugaagta ka keenaan guryahooda ama maktabadda dadweynaha ee caamka ah si ay uga isticmaalaan waqtigooda akhriska keli-keliga u furan.

Buugaagta ardayda dhallinyarada waxaa badanaa ku qoran hadal faa'iido leh oo ka hadla arrimaha xasaasiga iyo mowduucyada muujiyaa arrimaha dhallinyarada toban jiraalaha saameeyaa ama tabanaayaan iyo waxyaabo taariikhi ah. Mid ka mid ah hababka ugu wanaagsan ee waalidka ama mas'ulka ku kaalmayn karaan ardaydooda garashada buugaagta dhibka ah waa quursashada waqtigooda iyagoo la akhristaan ama ka dhagaystaan canugga oo buugga ku akhriya Afka Ingiriisiga, iyo sidoo kale ka wada hadlaan buugga marka la akhrinaayo. **Haddii buugaagta lasoo xulay aad ku qanci waysaan, waxaa la idiin oggolyahay in aad soo xushaan buugaag kale.**

Fadlan soo saxiixa halkan hoose, idinkoo caddaynaysaan in aad la socotaan mas'uuliyadda wax akhrista ee canuggiina koorskan iyo fursadda aad qabtiin in aad wax ka sheegtaan buugaagta canuggiina soo xulo. Waqti walbo aad su'aalo ama tabasho qabtiin, fadlan iga lasoo soo xiriira lambarkaan: _____ ama iisoo dira E-meeyl _____

Waxaan dhaawrayaa in aan la shaqeeyo canuggiina sanadkaan.

Niyadsame,

Magaca Ardayga: _____

Saxiixa Waalidka/Mas'ulka: _____ Taariikh: _____

Faallo: